

# Isbeddellada Aaladaha Wax Basaasa ee GPS

## Seattle Police Department (SPD)

### Waa maxay tiknoolajiyadu?

Aalada wax taraag gareeya ee GPS waa isku darka software iyo hardware loo adeegsado sheegista goobta iyo xogta socdaalka ee ku xiran gaariyaasha.

Aaladaha wax taraag gareeya ayaa loo adeegsadaa ogaanshaha goobta gaariyaasha doorka ku yeesha baaritaannada danbiyada. Aaladaha wax basaasa ee xogta gadiya ayaa lagu adeegsadaa damaanado, halkaasoo aaladaha war taraag gareeya ee yareynaaya baacsiga gaariyaasha loo adeegsado sababta macquulka ah ama tuhunka macquulka ah ee la xiriira gaariyaasha laga yaabo inay fakar yihiin.

Sanadkii 2022 Seattle City Council (Dawlada hoose ee Magaallada Seattle) ayaa ansixisay xeer fasaxaaya adeegsiga aaladaha GPS ee goobta sheega si loogu adeegsado ujeedooyinka

Waqtiga ay furan yihiin fikradaha dadwaynaha ee ku aadan qalabkaan ayaa hada socda. Waxaad faallooyin ku bixin kartaa

[Seattle.gov/SurveillanceComment](https://seattle.gov/surveillancecomment).

Faallooyinka dhamaan waxaa lagu dari doonaa Surveillance Impact Report (Warbixinta Saameynta Dabagalka) ee tiknoolajiyadaan waxaana loo gudbinayaa Gollaha.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso fal celin xili ka baxsan xilliga ay furan tahay faallada, fadlan si toos ugu dir Gollaha Magaalada.

### Muxuu isbeddelka aaladuhu codsaday?

- 25 kamid ah gaadiidka ilaallada amaanka ee SPD ayaa lagu xiri doonaa aaladaha wax taraag gareeya, kuwaasoo lagu xiraayo dhammaan xarumaha laanta hawlgallada.
- Saraakisha booliiska ee Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliiska Seattle) oo dhammaan la dhaariyay ayaa loo tababari doonaa adeegsiga aaladaha goobta basaasa ee GPS, taasoo xaqiijinaysa ku dhaqanka isbadellada cusub ee dhawaan lagu sameeyay sharciga gobalka ee la xiriirta yareynta baacsiga.
- Aaladaha goobta basaasa ee yareeya baacsiga ee GPS waxaa kormeeri doonta Xarunta Danbiyada ee Tooska ah xogta ayaana loo gudbin doonaa laamaha booliiska ee shaqada ku jira.

### Maxaanan isbeddeli doonin?

- Ma jiraan isbadello lagu sameyn doono shuruudaha horey loo ansixiyay ee la xiriira nidaamyada basaasida goobta.

